Folkpartiet på andra språk: **somaliska**

Folkpartiet – Xisbiga xorriyadda shakhsiyadeed ee dalka Iswiidan

Folkpartiet liberalerna waxa weeye xisbi aamminsan afkaarta xorriyadda shakhsiyadeed oo ka jira dalka Iswiidan. Laga soo bilaabo 2006 waxaan ka mid nahay dowladda ay ku midoobeen xisbiyada ku bahoobay Isbahaysiga dalka Iswiidan Allians för Sverige. Waxaan idinka codsaneynna inaad na siisaan kalsooni cusub – dugsiyada iyo shaqooyinka awgood.

Su'aalaha noogu muhiimsan waxa weeye:

» **Dugsiga.** Waa in la hormariyaa tayada natiijada waxbarashada dugsiyada iswiidhishka. Waxaan dooneynna inaan hirgelino in la bilaabo in la qaato shahaada waxbarashada oo kormeer lagu sameeyo waxbarashada dugsiyada si sida ugu dhaqsaha badan loo caawino ardayda u baahan caawimaad dheeraad ah. Macallimiinta waa in awood dheeraad ah loo siiyo si ay dugsiyada uga abuuraan nidaam iyo xasilooni. Waa in si aad ah looga hortago ardayda kadeedda ardayda kale.

» **Shaqada iyo ganacsiga.** Waa in waxbarashada iyo shaqadu noqdaan kuwo laga faa'iidayo. Waxaan canshuur dhan 1000 karoon bishii ka dhinnay dadka qaata mushaharada hoose iyo dhexe. Waxaanna dooneynna in aan sii wadno dhimista canshuuraha dakhliga iyo in aan wanaajinno shuruudaha ganacsiyada. Waxaan dooneynna in aan dhallinyarada u abuurno goobo tababar shaqo si ay lugaha u la galaan suuqa shaqada.

» **Badbaadada.** Waxaa habboon in dhammaan dadka shaqeeya ay ku jiraan caymiska shaqabeelka. Xaaladdu maanta sidaas ma aha. Waxaan kale oo dooneynnaa in aan wanaajinno ammaanka waayeelka oo aan sharci ka dhigno in ay dadka waayeelka ah xaq u leeyihiin inay meel ku wadanoolaadaan haddii midkood doonayo in uu u guuro guryaha dadka gabowga ah. Waa in la kordhiyaa dagaalka lagu la jiro falalka dembiyada waaweyn oo urureysan.

» **Ishdexgalka.** Markii xisbiga Socialdemokraterna xukunka ka degay, wuxuu isdhexgalku ahaa mid aad u liitaa oo waxay qofka dhowaan soo galay ku qaadaneysey toddobo sano inuu shaqo helo. Waxaan ognahay in shaqada iyo aqoonta afku

Välkommen att kontakta oss om du vill veta mer eller bli medlem!
www.folkpartiet.se
info@liberal.se
020–53 53 53

Vill du hjälpa till i valkampanjen?
SMS:a VOLONTÄR till 72080
så kontaktar vi dig.
Kostar som ett vanligt SMS.

ay fure u tahay isdhexgalka – sidaas awgeed waxaan kharashka ka dhimeynnaa shirkadaha shaqaaleeya qof dhowaan soo galay. Waxaa shuruudo bayaan ah lagu xirayaa barashada afka iswiidhishka oo loo qorayo barayaal aqoon wanaagsan leh. Waxaan dooneynnaa in aan dayactir ku sameynno guryaha duugoobay oo xaafadaha qaarkood ku yaal iyo in aan weliba duminno guryaha qaarkood haddii loo baahdo.

» **Yurub iyo adduunka.** Ma dooneynno in aan xaydaan ama gidaar isaga xirno dunida inteeda kale- waxaan dooneynnaa inaan albaabada u furno. Ganacsiga furan oo xorta ahi wuxuu u wanaagsan yahay dalka Iswiidan iyo dalalka kale. Waa in ay dalka Iswiidan xubin buuxda ka noqoto Midowga Yurug, EU – sidaas awgeed waxaan leennahay haa lacagta euro. Dadka qaxootiga ahi waa in ay xaq u yeeshaan in ay joogaan si ay uga magangalaan cadaadiska ay kala kulmaan dalalkooda hooyo. Waxaan difaaceynna hadafka ah in boqolkiiba hal lagu bixiyo caawimaadda dalalka saboolka ah. Lacagtaasna waa in loo isticmaalo la dagaal-lanka gaajada iyo xoojinta horumarka dimoqraadiyadda. Dalalka keliyaliyayaa-sha ahi caawimaad kama heli doonaan dalka Iswiidan .

» **Sinnaanta ragga iyo dumarka.** Waa in la yareeyo carqaladaha hortaagan gun-nada sinnaanta ee la siiyo waalidka fasaxa carruurta ku jooga – lacagtu waa in ay toos ugu soo dhacdo koontada mushaharka adigoo aan u baahan inaad arji u qorato. In hirgeliyo gunnada sinnaanta oo lacag dheeraad ah lagu siinayo labada waalid oo si isle'eg u qaybsanaya maalmaha guriga la la joogo ilmaha xanuunsan. Waa in la adkeeyaa ciqaabta falalka ku xadgudubka dumarka oo culus. Nimanka jebiya mamnuucidda booqashada waa in lugta looga xiro qalab elektaroonig ah.

» **Cimilada.** Isbeddelka cimiladu waxa weeye khatarta ugu weyn waqtiga aan ku nool nahay. Waxaan dooneynnaa in aan sii haysanno oo sii horumarinno istic-maalka awoodda nukliyeerka si loo yareeyo siideynta karboon laba oksaydh. Waxaa loo baahan yahay heshiis cimilo oo caalami ah oo lagu wada khasban yahay. Waxaan loo baahan yahay in la dhiso isticmaalka awoodda dabaysha iyo awoodo kale oo la cusbooneysiin karo iyo in la kordhiyo dhaqaalaynta tabarta.

Tijaabooyinka mustaqbalka

Xaaladda dhaqaale xumada dunidu waxay dharbaaxo xoog leh soo gaarsiisay dalka Iswiidan . Laakiin waxqabadka dowladda isbahaysiga ayaa waxay dalka Iswiidan uga badbaadiyeen waxyeelada dhaqaalexumada si ka wanaagsan dalalka kale oo badan.

Waxaan mudnaanta koowaad siinnay shaqada. Siyaasad miisaaniyad oo wax ku ool ah awgeed ayaannu dardargelinay dhaqaalaha. Haddii aan miisaaniyadda qaranka hab wanaagsan loo maamulin waxay keeni lahayd in dhaqaala-xumadii sannadii dambe ay sababaan in la dhimo adeegga bulshada oo la kordhiyo canshuurta.

Koritaanka dhaqaaluhu aad ayuu wanaagsan xilliga dowladda oo soo socda. Awoodda sookabashada dhaqaalaha gudahu wuxuu ku xiran yahay siyaasadda dalka lagu maamulo. Waxaa ugu muhiimsan in dad badani shaqo bilaabaan. Cans-huurta shaqada oo la dhimo waxay kordhineysaa waxtarka in la shaqeeyo oo haddii loo baahdo wax laga beddelo xeerarka canshuurta iyo shaqada.

Dhallinyarada u baahan tababar shaqo waxay bilaabi karaan goobo shaqo loogu tababaro.

Waa in ay waxtar leedahay in wax la barto. Waa in ay waxtar leedahay in loo bareero in ganacsi la bilaabo. Waa in ay fududaataa in dad la shaqaaleeyo. dalka Iswiidan waa ay noqotaa dal xirfadaha ugu horreeya si dalalka kale looga soo jiito fekrado cusub iyo aqoonyahanno cilmi-baaris.

Wuxuu dalkeennu ku dhisan yahay shirkadaha tamarta aad u isticmaala. Awood nukliyeer oo cusub oo beddesha kuwii gaboobay waxay dalka Iswiidan ka dhigey-

saa dalka warshadihiisa u isticmaala awood koronto oo aan lahayn kaarboon labo oksaydh.

Haddaba si waxtar looga helo shaqada iyo waxbarashada waa in dalka Iswiidan ku noqotaa habkii kororka mushaharada oo ahaa nus ayaa haray – waa in aan qofna bixin in ka badan boqolkiiba 50 boqolkii karoon oo la shaqeeyaba.

Furaha in isdhexgalka lagu guuleystaa waxa weeye shaqada iyo barashada afka. Waa in la sii wanaajiyaa barashada af-iswiidhishka loogu talagalay shisheeyaha. Bilaa-bidda shaqooyinka iyo shaqo cusub tijaabintu waxay dadka dhowaan soo galay u fududeyneysaa sidii ay lugaha u la geli lahaayeen suuqa shaqada.

Qofka shaqadu ka dhammaato waxaa u muhiim ah inuu ku jiro hab caymiska shaqala'aan. Waxaa la dhaqabgelinayaa caymiska shaqala'aan oo guud.

Waxbarasho heer caalami ah

Dugsiyadu waxa weeye qalabka ugu wanaagsan oo aan ku siinno dadkoo dhan fursado isku mid ah. Siyaasad waxbarasho oo wax ku ool ahi waxay dhammaan ardayda fursad u siineysaa in ay guuleystaan.

Habka dib u cusbooneysiinta dugsiyada iswiidhan waxa weeye hawsha ugu mu-hiimsan ee xisbiga Folkpartiet. Waa in shahaada-bixinta lagu bilaabaa fasalka lixaad, waana in la dhaqangeliyaa hannaan waxbarashada macallimiinta. Imtixaanka qa-ranka ee fasalka saddexaad oo dhowaan la bilaabay waa la dabagalaa si taageero loo siiyo ardayda ku guuleysan weyday in ay gaarto ujeeddada imtixaanka. Dowladda ayuu saaran yahay xilka ugu weyn ee waxbarashada dugsiyada.

Hab lagu la kulmo Isu soo dhowaashaha adduunka waxa weeye iyadoo la barto afaf shisheeye. Sidaas awgeed waa in ardaygii baranaya ugu yaraan labo af loo xisaabiyaa kolkii uu u gudbayo dugsiga sare. Afka Shiinuhu waa in uu noqdaa af cusub oo lagu barto dugsiyada sare.

Wadashaqaynta dunida ee casrigaan

dalka Iswiidan waa in ay albaabada u furtaa dunida inteeda kale – oo aan gidaarro la isku wareejin. Ka mid noqoshada EU waxay dalka Iswiidan fursad u siineysaa in ay saamayn ku yeelato waxa ka dhacaya dunida. Waxaan dooneynna in la ballaariyo wadashaqaynta Yurub, sidaas awgeed waa in euro noqotaa lacagta laga isticmaalo dalka Iswiidan.

Cid waliba waa ay ka faa'iidaneysaa ganacsiga xorta ah. Waa in la dumiyaa gidaa-rada ay EU isaga wareejisay dalalka fakhriga ah. Waxaa dalalka hantida badan xil mooraal ah ka saaran yahay la dagaallanka gaajada iyo horumarinta dimoqraadi-yadda. Waa in lagu sii dhaqmaa bixinta mucaawinada oo ah boqolkiiba hal.

Waxaan difaaceynna siyaasad qaxooti oo deeqsi ah. Xaqa magangelyadu waa xaq bani-aadan. Dadka ka soo cararay cadaadis waxay xaq u leeyihiin in magangelyo laga siiyo dalka Iswiidan iyo dalalka kale oo dimoqraadiga ah.

Ammaanka

Waxaa loo baahan yahay in la kordhiyo in ammaan laga ahaado falalka dembiyada. Waxaan tirada boliiska ka soo kordhinnay 17000 oo gaarssinnay 20000. Waxaa loo baahan yahay hawlo ka hortag iyo dareen degdeg ah si looga hortago in dhallinya-radu ay caadeystaan falalka dembiyada.

Ma aha wax wanaagsan in dadka dal horumaray lagu khasbo in ay kala degaan kolka midkood uusan guriga sii degi karin. Waxaa loo baahan yahay sharci cusub oo xaq u siinaya lammaanayaasha waayeelka ah in ay isla noolaan waqtiga yar oo noloshooda uga haray.

Waa in la sii wadaa hawlaha isbitaalada maskaxda. Qofka u baahan daryeel xagga maskaxda waa in uu si degdeg ah ugu helaa. In aan loo fududayn dadka naafada ah waxaa loo arki karaa takoorid.

Xoog isugu geynta sinnaanta

Sinnaantu waa arrin xorriyadeed. Waa in aan sii wadnaa in aan xoogga saarno in dumarku madaxbannaadaan dhaqaale ahaan. Waa in laga hortagaa in ay qofka khasab ku noqoto in uu waqti gaaban shaqeeyo. Si loo dhiirigeliyo sinnaanta waalidka waxaa loo baahan yahay in la fududeeyo gunnada sinnaanta oo la sii ballaariyo.

Xoogsheegasgada dumarka loogu isticmaalo dumar ahaan waxa weeye arrin sinnaan. Waa in la xoojiyaa dagaalka lagu la jiro dembiyada la xiriira galmada oo aad xoogga loo saaro dadka gala falalkaas.

Cimilada awgeed waxaa la dhisaa awoodda nukliyeerka

Su'aasha cimiladu waxa weeye arrinka ugu weyn ee hadda na hortaagan. Dalka Iswiidan iyo EU waa in ay sameeyaan dadaal dheeraad ah oo lagu dhaqangeliyo heshiis cimilo oo caalami ah iyo in aan tusaale u noqonno gaarista ujeeddada cimilada.

Waa in la dhisaa awood nukliyeer cusub oo lagu beddelo kuwa hadda jira oo waqtigoodu dhacayo. Isticmaalka awoodda nukliyeerka iyo tamarta la cusbooneysiin karo waxay dalka Iswiidan ka dhigeysaa mid mustaqbalka laga isticmaalo awood koronto oo aan lahayn kaarboon laba oksaydh. Shaqada cimiladu waxay lafdhabar u tahay in la dhawro nolosha xayawaanka iyo dhirta. Waa in aan laga maagin gaarista ujeeddada cimilada badda.

Horumarinta iyo soosaaridda baabuurta korontada ku shaqeeya waxay yareyneysaa gaaska gaadiidku siidaayo. Waana in la dhaqangeliyaa abaalmarin la siiyo ciddii isticmaasha gaadiidka aan waxyeelaynayn cimilada.